**Guddiga Maamulka Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban**
Kulanka 54aad ee 8da Maarso 2022 – Fogaan-arag

**Arrimaha Batroolka iyo Gaaska:** Shirka ayaa looga hadlay xaaladihii ugu dambeeyay ee ku soo kordhay arrimaha shidaalka iyo gaaska oo ka mid yihiin Heshiiska Waxsoosaar Wadaaga ee uu Guddiga Isku xirka Wasaaradahu ansixiyay bishii Nofembar 2021 iyo bixinta todobada Waxsoosaar Wadaaga ee loo saxiixay Shirkadda Coastline bishii Febraayo 2022, heshiiskaasi oo ay markii dambe laaleen Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxuu sii joogteeynayaa bixinta talooyin la xiriira tillaabooyinka xiga ee Qandaraasyada, Gorgortanka, iyo Abaalmarinta Heshiisyada Waxsoosaar Wadaagga ee arrimaha shidaalka. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta oo ka qeyb galay kulanka ayaa ka warbixiyey tillaabooyinka loo qaaday laalidda Hesiisyadii la saxiixay, wuxuuna soo dhaweeyay talada Guddiga ee ku aaddan hannaanka dib-u-eegista nidaamka qandaraasyada iyadoo la raacayo shuruucda iibka iyo shidaalka. Shir Gudoomiyaha ayaa carabka ku adkeeyay in hannaanka ruqsad-siinta shidaalka iyo gaaska lagu hagi doono shuruucda dalka.

**Heshiiyada iyo Qandaraasyada**: Kulanka ayaa lagu xusay go’aamadii Madaxweynaha iyo Ra’iisul Wasaaraha ee lagu xakameenayay bixinta qandaraasyo waaweyn inta lagu guda jiro xilliga doorashada. Go’aandaan ayaa ku taliyay in qandaraaska raashinka cusub uu u baahan doono inuu sugo bilowga xukuumad cusub. Kulanka ayaa sidoo kale lagu lafa guray tillaabada xigta ee lagu qeexayo baaxadda qandaraaska hubinta tayada badeecada la soo dhoofiyo si loogu diyaargarowdo qabashada tartan furan kadib marka xukuumad cusub la soo doorto.

**Warbixinta Maamulka Maaliyadda (FGR) 2022**: Shirka ayaa looga hadlay diyaarinta warbixinta maamulka maaliyadda ee 2022, waxaana la isla gartay waqtiga iyo qaabka loo diyaarinayo warbixintan sanadlaha ah si soo saarista warbixin loogu beego xiliga xukuumadda cusub.

**Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha**: Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa sii wada dib u habeynta arrimaha dhaqaalaha iyo taageerada heyadaha dhaqaalaha ee dalka. Guddiga Maamulka Maaliyadda ayaa Bangiga iyo hogaankiisa ugu hambalyeeyay guusha ay dhawaan ka gaareen bixinta shatiga sedexaad ee shirkadda Somlink. Bangiga Dhexe waxuu horumar la taaban karo ka samaysay horumarinta Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka oo hadda ku xiran yihiin 13 bangi oo shati leh oo Soomaaliya ka jira. Bangiga ayaa ku howlan dhamaystirka iyo daah-furka Sistem Lacag-bixinta Soomaaliya oo ah qayb muhiim ah oo ka mid ah Nidaamka Lacag-bixinta Qaranka. Bangiga waxuu ka shaqaynaysaa diyaarinta dhowr sharci oo muhiim ah oo ay ka mid yihiin sharciga caymiska iyo sharciga lacag bixinta qaranka, kuwaasi oo loo gudbin doono Baarlamaanka soo socda si uu u ansixiyo.